

**Xeer Sharci 2 Jannaayo 1957, lamba. 1 rep.
Abuuridda Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya**

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 ee ku saabsan Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya;

Marka uu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 ee ku saabsan Xeer Hoosaadka Xukuumadda Soomaaliya;

Marka uu garowsaday baahida iyo deg-degga loo qabo in la sameeyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya si loogu baahiyo xeerarka iyo dekereetooyinka iyo qaraarada kale ee Xukuumadda Soomaaliya, ama qoraalada ay tahay in la faafiyo;

Marka uu dhagaystay soo jeedinta Golaha Wasiirada;
oo uu soo jeediyay Wasiirka Arrimaha Guud;

Iydoo la tixgalinayo awoodda uu siinayo qod. 8 ee Amarka 5 Jannaayo 1956, lamba. 2;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAAARAYAA

Qod. 1

Waxaa la abuuray Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya si loogu baahiyo xeerarka, dekereetooyinka iyo qaraarada kale ee Xukuumadda Soomaaliya.

Qod. 2

Qaraaradu waxay dhaqangalayaan 15 Jannaay ee soo socota oo laga soo bilaabo marka lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya, haddii aan si ka duwan loo sheegin.

Qod. 3

Hagidda iyo soo saaridda Faafinta Rasmiga waxaa iska leh Wasaaradda Arrimaha Guud – Waaxda Adeegyada.

Qod. 4

Qiimaha lagu iibinayo waxaa lagu goynayaa dekereeto uu saaro Wasiirka Arrimaha Guud.

Qod. 5

Dekereetadan waxay dhaqangalaysaa 2 Jannaayo 1957 waxaana la horgeynayaa Golaha Xeer Dejinta si xeer loogu baddalo muddo aan ka badnayn bilowga kal-fadhiga ku soo fool leh taariikhda la baahiyo.

Muqdisho, 2 Janaayo 1957.

P. Maamulaha
P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Maxamuud Cabdi Nuur

Lagu sugay lamba. 3, 15 Jannaayo 1957.

Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La sugay lana Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 1 – bogga 1

Muqdisho, 2 Jannaayo 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**